AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Ku-xirnaanshaha

Akharinta Fudud



Ku sii-xirnaanta bulshadada waxay kaa caawin kartaa inaad Australia degto.



Dareemidda ku xirnaanta saaxiibadaada iyo qoyskaaga dibadda ayaduna waa muhiim.

## Bulshada iyo naadiyada mujtamaca



Waxaa Australia ka jira adeegyo kuwaas oo taageera soogalootiga.



Waxaad la xiriiri kartaa dadka deegaankaaga adigoo ka mid noqda kooxaha mujtamaca iyo kuwa bulshadeed, oo ay ka mid yihiin:

- Haya'daha bulshada



- Naadiyada cayaaraha



- Kooxaha bulshada



Waxaad heli kartaa waayo-aragnimooyin cusub.




Waxaad sii wadi kartaa inaad ka qaybqaadato xiisaha iyo nashaadyada kuwaas oo aad hore u jeclayd.

# Maktabadaha



Maktabadaha dadweynaha waxay leeyihiin waxyaalo la aqristo oo ku qoran luqado badan.

Waxaad:




- ku aqrisan kartaa maktabadda



- ka amaahan kartaa oo u qaadan kartaa guriga

Badiba maktabaduhu waxay kaloo leeyihiin:



- kombiyuutaro aad isticmaali karto




- helitaanka lacag la'aanta ah ee intarneedka

# Taleefishinka iyo raadiyaha




Haya'dda Adeegga Warbaahinta Gaarka ah (Special Broadcasting Service - SBS) waxay siisaa wararka oo ku baxa luqado kala duwan.




Waxaad taleefishinka ka daawan kartaa SBS.



Waxaad ka dhagaysan kartaa SBS raadiyaha.

# Taleefanada



Waxaad ka samayn kartaa wicitaanada taleefanka:

- khadka-dhulka
- taleefanada moobaylka

**Taleefanada-dhulka**



Taleefanada-dhulka waa taleefan ku xiran gurigaga.



Waxaa jira shirkado badan oo kuu xiri kara taleefanada-dhulka.





Waxaa laga yaabaa inaad bixiso khidmadda xiritaanka.




Waxaad heli doontaa biil bil kasta oo aad ka bixinayso wicitaanadii aad ka samaysey adoo adeegsanaya taleefonka.

## Talefanada moobaylka ah



Taleefanada moobaylka ah waxay noqon karaan walxo waxtar badan in la helo hase ahaatee waxay ku kacayaan qarash badan in la adeegsado.





Taleefankaaga moobaylka ah wuxuu noqon karaa:

- mid Hore-loo-sii-bixiyey
- mid qorshe ku salaysan



Taleefannada hore-loo-sii-bixiyey waa fiican yihiin haddii aad doonayso inaad xadido intaad ku qarashgaraynayso – ma qarashgaraynasid wax ka badan intaad awoodo.



Waxaad bixinaysaa kahor intaadan isticmaalin taleefanka.

Kaasna waxaa loo yaqaan kareedhit.




Haddii aad isticmaasho kareedhitkaaga oo dhan ma awoodi doontid inaad isticmaasho taleefanka ilaa aad ka gadato kareedhit dheeraad ah.




Kan qorshaha ku salaysan waa inaad saxiixdaa heshiis.




Waxaad bixin doontaa isla xadi bil kasta.



Waxaa jiraya ilaa qadar wicitaano ah oo aad samayn karto.



Haddii aad samayso wicitaano ka badan qorshahaaga intuu ogolaa waa inaad bixisaa lacag dheeraad ah.




Wicitaanada taleefanka degaanka ah qarash badan ma lahan.




Waxay ku kacaysaa lacag badan si loo sameeyo wicitaano meelaha:

- Australia ah hase ahaatee aadka u fog
- waddanka Dibadiisa



Waxaad gadan kartaa kaararka taleefanka kuwaas oo aad u adeegsan karto si aad u samayso wicitaanada dibadda kuwaas oo qarash yar.

## Boostada



Waxaad dhigi kartaa boostada warqadaha iyo xidhmooyinka ku socda cinwaan kasta:

- Australia
- badiba meelaha waddanka dibadiisa ah




Waxaad ka gadan kartaa istaambooyinka xafiiska boostada.




Waxay ku kacaysaa qarash badan in loo diro waxyaalaha meelaha waddanka dibadiisa ah.

# Intarneedka




Intarneedku waa hab waxtar badan si laysugu xirnaado.


Si aad ugu isticmaasho intarneedka guriga waxaad u baahan tahay:



- kombiyuutar



- xiritaanka intarneedka





Waxaad ka heli kartaa xiritaanka intarneedka adoo u mara Bixiyaha Adeegga Intarneedka (Internet Service Provider - ISP).





Waxaa jira ISP-yo badan. Waa inaad la hadashaa dhowr ISP kahor intaadan dooran:

- ISP
- Qorshaha




ISP-yadu waxay leeyihiin qorsheyaal kala duwan oo la kala dooran karo.

Qorsheyaashu waxay ku siinayaan macluumaad aad adeegsan karto kaas oo aad bixinayso bil kasta.



Waxaad kaloo adeegsan kartaa taleefanada smart phone-ka ah iyo tablet-yada si aad u hesho intarneedka.



Taleefanada smart phone-ka ah iyo tablet-yada waa kombiyuutaro yaryar kuwaas oo leh shaashada garaacidda.

$$$

Waxay yihiin kuwo ku fudud in la adeegsado hase ahaatee waxay ku kacayaan qarash dheeraad ah.



Waxaad adeegsan kartaa kombiyuutarka yaal maktabadda degaanka oo lacag la'aan ah haddii:

- aadan haysan kombiyuutar
- aadan ku xirnayn intarneedka



Qofka maktabdda ka shaqeeya ayaa ku caawin kara haddii aadan isticmaalin kombiyuutar hadda ka hor ama aadan isku kalsoonayn.

Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyey

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM